**Shax – Ciyaar dhaqameed soo jireen ah iyo jiilka maanta ee kombyuuterka**
*Waxa qorey Jaamac Muuse Jaamac*

Waxa turjumay Mustafe Aadan Nuur iyo Khaalid Jaamac Qodax.

*Qoraalkan waxa laga soo dheegay buug-yare dhawaan soo bixi doona oo ay wada turjumeen Mustafe Aadan Nuur iyo Khaalid Jaamac Qodax oo labaduba ka tirsan Naadiga Akhristeyaasha Hargeysa (HRC).*

**Hordhac**
Shax4Win waa barmaamij ku shaqeeya Windows XP/NT/Vista oo kombiyuuterkaagu kugula ciyaari karo Shaxda. Waxa ku wada ciyaari kara laba qof, amase qof iyo kombiyuuter. Heerka aqoonta kombiyuuyterka, amase fikirka uu ku garan karo guuritaanka ku habboon marka ay ciyaartu gacantiisa ku jirto, waxa ay ku xidhan yihiin hadba derejada aad doorato. Derejooyinkaasi waxay kala yihiin "Ayaxley (dummy)", "Baqlooley (beginner)", "Fardooley (novice)" iyo "Kormeere (expert)". Nooca kowaad ee shax (ver 1.0) ee maanta aynu halkan kasii daynayno, waxa ku jira oo kaliya heerarka aqooneed ee "Ayaxley" iyo "Baqlooley". Nooca Ver 1.1 oo soo bixi doona dhawaan, haddii Alle idmo, waxa la socon doona isna heerka "Fardooley", timaaddada dhowna waxa soo bixi doona "Kormeere". Ereybixinta derajada waxa lagu saleeyey sida Hargeysa looga yaqaanno, sida ku cad xogwaraysiga ay soo ururiyeen xubnaha *WikiShax* Project (eeg tixraaca).




Haddaba inta aanaynu sharxin sida uu u shaqaynayo barmaamijka Shax, aynu dib ugu noqonno ciyaartan iyo xeerarkeeda. Shaxdu waa ciyaar dhaqameed soo jireen ah, waqti isku dhaafis ka sokow waxay had iyo jeer ahayd si la isugu gudbiyo xafiiltan, sarbeeb iyo duurxul wax la isugu sheego; amase lagu gaadho go'aan sare oo saameeya nolosha bulshada guud ahaan.

**Ciyaartoyda**
Shaxda waxa wada ciyaara laba ciyaartoy (laba qof; amase qof iyo kombiyuuter).

**Miiska ciyaarta**
Miis-shaxeedku waa miis ka mid ah ciyaaraha qadiimka ah ee la isku yidhaahdo Moris family games. Waxa uu ka koobanyahay saddex afar-gees, oo mid waliba ka kale gudaha ugu sii jiro, afar-geesyadaasi oo ay isku xidhiidhinayaan laba xarriiqood oo jiifa iyo laba gudbani. Reerka-walxaha aad dhigayso miiska shaxda, waxa la dhigayaa halka xariiqyada is dhaaf-dhaafsani ay iskaga yimaadaan, halkaas oo ay ka soo baxayaan 24 god oo ah wadarta godadka la degayo. Soomaalidu kuma ciyaaraan badiyaa miis-shaxeed la farsameeyay, balse waxa ay jeexdaan ama miis-shaxeedka ay ku sawiraan dhulka dushiisa. Reerka lagu ciyaarayaa badiyaa waa walxo yar-yar oo midabbo kala duwan leh. Dhagaxan midabaysan ayuu labada ciyaartoy midi isticmaalayaa, halka ka kale uu isticmaalayo dhuxul yar-yar amase saalo geel, dabadeed, waxay isku noqonayaan laba dersin oo caddaan iyo madow ah.

**Reerka (walxaha lagu ciyaarayo)**
Shaxda waxa lagu ciyaaraa 24 walxood oo laba midab oo kala duwan leh. Ciyaartoy waliba waxa uu bilaabayaa in uu laba iyo tobankiisa walxood miis-shaxeedka dibadiisa ku diyaarsado (badiyaa walxahaasi uu ciyaartoygu ku ciyaarayo waxa la yidhaahdaa “Reer”).

**Sharciga shaxda**
Shaxdu waa saddex qaybood. Wejiga hore waa qorshaynta sidii aad u degi lahayd, wejiga labaadna waa furitaanka ciyaarta, kan ugu dambeeyaana waa ku tartamida rarida iyo guuritaanka.

***Wejiga 1aad: Habka degitaanka***
Ciyaartoydu markiisa ayuu reerkiisa midkasta oo ka mid ah dhigayaa halka ay xariijimuhu iska gooyaan ee miis-shaxeedka. Ciyaartoygu haddii uu helo ama uu dego xariiqda gudban ama jiifta saddex xabbo oo isku beegan waxa uu sameeyay “jare”. Inta lagu gudo jiro wejigan, ciyaartoyga ku horreeya ee sameeya jare waxa uu leeyahay fursadda uu ku bilaabayo wejiga labaad ama saddexaad ee ciyaarta. Wejigan gudihiisa ciyaartoyga dhista qorshe fiican waxa uu ku dhammaynayaa muddo yar.

***Wejiga 2aad: furitaanka ciyaarta***
Wejigan labaad waxa uu ka koobanyahay keliya labadan qaybood oo qudha oo midba uu leeyahay hal ciyaartoy. Ciyaartoydii hor sameeyay jarihii u horreeyay intii lagu gudo jiray wejigii hore ayaa bilaabi doona oo mid reerka ciyaartoyda ay wada ciyaarayaan reerkiisa ah ka qaadi doona miis-shaxeedka. Ciyaartoyda kalana sidoo kale ayuu yeeli doonaa isna. Haddii aannu midkoodna samaynin jare wejigii hore ee ciyaarta, ciyaartoydii bilaabay ama hor degay ayaa fursada furitaanka ciyaarta siin doona ciyaartoyda ka soo horjeeda.

***Wejiga 3aad: guuritaanka***
Ciyaartoydu, mid waliba markiisa ayuu u rari doonaa mid ka mid ah reerkiisa si gudban ama jiifta isagoo u guuri doona godka ugu soo xiga ee bannaan. Ciyaartoyga bilaaba ciyaarta wejigeeda labaad waxa uu bilaabi doonaa isla wejigan saddexaad sidoo kale. Mid kasta oo ka mid ah reerkaagu ama walaxda aad ku ciyaaraysaa kama boodi karto mid kale oo ciyaartoyda kale ku ciyaarayo, waxa keliya ee ay u guuri karaa godka banaan ee ku soo xiga. Meelkasta oo ciyaartoygu uu ka sameeyo jare, waxa uu mid ka cunayaa ama mid ka saarayaa reerka ciyaartoyda kale ee ka soo horjeeda ee miis-shaxeedka yaalla. Haddii uu ciyaartoy uu guuri kari waayo, waxa uu odhanayaa "jid isii aan jare lahayn" oo macnaheedu tahay: waxa aad isiisaa meel aan u guuro oo aan jare lahayn. Xaaladdan oo kale ciyaartoyga kaasoo horjeedaa waxa uu samayn doonaa

guuritaan dheeraad ah kaasi oo uuna uga dan lahayn in uu jare ku sameeyo, haddii uu mid sameeyona, kama saarayo ama mid kama cunayo miis-shaxeedka.

***Gebagabada ciyaarta***
Haddii mid ka mid ah ciyaartoyda reerkiisu ka yaraadaan saddex dhagax, markaa ciyaartoygaasi waa laga badiyey.

***Isku-beegidda degitaanka Shaxda ee qaab-dhismeedyo caan ah***
Waxa jira qaab degitaan uu ciyaartoyga xariifka ahi had iyo jeer maanka ku hayo markuu degayo, guurayo amase is difaacayo. Waxaa ka mid ah Afarrey, Afarrey duuban, Irmaan, Laba jare. Degitaannadaasi waxay u saamaxaan ciyaartoyga hor hela, in uu si sahlan ugu guulaysto ciyaarta.

**Mashruuca Shaxda ee 2010 (WikiShax Project)**

Bandhiga Buugaagta Caalamiga ah ee Hargeysa iyo Bandhig dhaqameedka Mooge Festival ee sannadkan 2010 waxa ay maalin u qoondeeyeen ururinta taariikhda, suugaanta iyo wax kasta oo xidhiidh la leh ciyaarta Shaxda. Waxa maalintaas dhici doona tartan qarameed lagu baratansiiyo shaxda cid kasta oo aqoon u leh. Waxa kale oo ku lammaan debbaaldeggaas, hoyga xog ururinta ee Shaxda (www.redsea-online.com/shax) halkaasoo lagala degi karo si bilaash ah barmaamijka Shaxda; isla markaana qof kastaa uu ku dari karo, waxna ka beddeli karto xogta lagu kaydiyey. WikiShax Project waxa uu u mahadcelinayaa turjumayaasha qoraalkan oo xil dheeraad ah iska saaray hawshan. Waxa kale oo u mahadnaqayaa dhammaan inta ka qaybqaadatay dhismaha mashruuca, gaar ahaan Cabdalle Cismaan Shafey oo ka tala bixiyey, Jaamac Axmed Maxamed (Naadiga Akhriska ee Halkaraan) "*Sidee shaxda looga ciyaaraa Burco*"; Ciise Muuse Aadan iyo Cabdiraxiim Aadan Buuni "*Sidee Shaxda looga ciyaaraa Hargeysa",* Axmed Riiraash (Murtimaal) oo ka qaybqaatey tijaabintii barmaamijka intii aan la shaacin. Waxaannu qof kasta ku martiqaadaynaa in uu nala wadaago wixii aqoon ah ee u leeyahay shaxda, gaar ahaan waxaanu dhiirigelinaynaa in qofkastaa noo soo sheego sida looga ciyaaro magaalada uu deggan yahay, islamarkaana soo diro sawirro iyada oo la ciyaarayo.

**Sidee aan ugu ciyaaraa Shax3Win?**
Marka hore bilaash uga la soo deg barmaamijka halkan: www.redsea-online.com/shax dabadeedna guji nudda "download". Marka aad ku dejiso kombiyuuterkaaga, laba-jeer guji (double click) faylka aad lasoo degtay, oo raac tallaabooyinka uu ku tusayo si aad ugu shubato Shax4Win kombiyuuterkaaga. Intaa ka dib kici adiga oo u maraaya Start->Programs->Shax->Shax for windows.

Haddii aad doonayso in aad adigu hor degto, guji "Left starts". Haddii aad doonayso in uu kombiyuuterku hor bilaabo guji "Right starts". Dabaeedna marka ay gacantaada tahay qaado dhagax ka mid ah kuwaaga debedda yaalla oo deg god ka mid ah kuwa bannaan. Raac xeerarka shaxda ee kor ku qeexan.

Haddii aad doonayso in aad beddesho heerka garaadka kombiyuuterka ama nooca ciyaartoyga (Qof – Qof ama Qof - Kombiyuuter), guji "About  Shax Game" oo dooro sida aad adigu rabto. Dabadeedna guji "Safe and Exit".




**Maxaa ku cusbanaan doona Shax4Win ver 1.2?**

- In Afsoomaali lagu turjumo dhammaan sharciyada iyo qaybaha kale ee barmaamjika.
- In uu heerka garaadka kombiyuuterku koro oo u gudbo  fardooley (novice)

**Tix raacyo**


1. Jama Musse Jama, *Shax: the preferred game of our camel-herders and other traditional African entertainments*, Roma, 2000
2. Ciise Muuse Aadan iyo Cabdiraxiim Aadan Buuni, *Sidee Shaxda looga ciyaaraa Hargeysa,* WikiShax Project (www.redsea-online.com/shax/wiki)